# Ka faa'idaysiga waqtiga iyo halista ay leedahay lumintiisa

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{ وَالْعَصْرِ * إِنَّ الْإِنْسَانَ لَفِي خُسْرٍ * إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَاصَوْا بِالْحَقِّ وَتَوَاصَوْا بِالصَّبْرِ}**

**(Waxaan ku dhaartay waqtiga casarka ah * In Dadku khasaaro ku sugun yahay * Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee Camal fiican falay, isuna dardaarmay xaqa, isuna dardaarmay Samirka)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Waqtiga aad buu u muhiimsan yahay, qiime weyn ayuu ku leeyahay nolosha aadanaha, wuxuuna ka mid yahay nimcooyinka ugu waaweyn oo Alle (caza wa jalla) nagu galladaystay, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَسَخَّرَ لَكُمُ الشَّمْسَ وَالْقَمَرَ دَائِبَيْنِ وَسَخَّرَ لَكُمُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ * وَآتَاكُمْ مِنْ كُلِّ مَا سَأَلْتُمُوهُ وَإِنْ تَعُدُّوا نِعْمَةَ اللَّهِ لاَ تُحْصُوهَا}.**

**(idiinkuna sakhiray Qorraxda iyo Dayaxa si joogta ah idiinna sakhiray habeenka iyo Maalinta * idinkana siiyey wax kastood warsataan, haddaad tirisaan Nicmada Eebana ma koobi Kartaan)**

Qofka fiirfiirya quraanka kariimka wuxuu ogaanaa inuu waqtiga aad ugu dadaalay, afar suuradood oo ka mid ah suuradaha quraanka kariimka waxaa la siiyay magacyada waqtiyada qaar, waa suraatu alfajr, iyo sauuratu allayl, iyo suuratu adduxaa, iyo suuratu alcasr, sidoo kale Alle (SW) wuxuu ku dhaartay waqtiyada taasoo ku soo aroortay meelo badan, wuxuu leeyahay Alle:

**وَالْفَجْرِ * وَلَيَالٍ عَشْرٍ * وَالشَّفْعِ وَالْوَتْرِ}،**

**(Eebe wuxuu ku dhaartay Waabariga * Iyo Habeennada Tobanka ah (Arrafo) * Iyo Tirada siman iyo tan is dheer)**

Wuxuu leeyahay (SW):

**{وَالضُّحَى * وَاللَّيْلِ إِذَا سَجَى}،**

**(Eebe wuxuu ku dhaartay Barqinka * Iyo Habeenku markuu xasilo (Madoobaado)** wuxuu leeyahay (SW):

**{وَاللَّيْلِ إِذَا يَغْشَى * وَالنَّهَارِ إِذَا تَجَلَّى}**

**(Eebe wuxuu ku dhaartay Habeenku markuu wax qariyo * Iyo markay Maalintu Muuqato (ifto))**

Dadaalkan daran uu quraanka ku dadaalayo waqtiga wuxuu na tusinayaa siduu u muhiimsan yahay, iyo in waajib ay tahay in camalka wanaagsan lagaga faa'idaysto kaasoo wax u taraya nafta iyo bulshada iyo dalka wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{فَاسْتَبِقُوا الخَيْرَاتِ}**

**(khayrka ku tartama)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**( اغتنِمْ خمسًا قبل خمسٍ: شبابَك قبل هَرَمِك، وصِحَّتَك قبل سَقَمِك، وغناك قبل فقرِك، وفراغَك قبل شُغلِك، وحياتَك قبل موتِك)**

**(shan ka faa'ideyso shan intaysan kugu imaanin: dhalinyarnimadaada duqnimadaada kahor, caafimaadkaaga jirradaada kahor, hodonnimadaada saboolnimadaada kahor, firaaqadaada mashquulkaaga kahor, noloshaada geeradaada kahor)**, wuxuu leeyahay Xasan Alabasri (Alle ha u naxariistee): Aadamow waxaad tahay uun maalmo maalin hadday tagto qeyb ayaa kaa tagtay.

Sidaa awgeed waxaa nagu waajib ah inaan habayno waqtiyadeena, qeyb kastana aan ka faa'idaysano, sekan kaste nolosheena ka mid ah waa inaan ka faa'idnaa, firfircoonida firfircooni bay dhashaa, wahsigana wahsi buu dhalaa, wax yar marka lagu daro wax yar kale wuxuu noqon wax badan, nolosha aadanaha waa qeybo watiga ka mid ah marka laysku daro waa noloshiisa oo dhan, maxaa ka wanaagsan qofka yiri:

**دَقَّاتُ قَلْبِ المَرْءِ قَائِلَةٌ لَهُ * إِنَّ الحَيَاةَ دَقَائِقٌ وَثَوَانِ**
**Garaaca wadnaha qofka wuxuu ku leeyahay ***
**Nolosha waa daqiiqooyin iyo sikinno**

Waxaan sugaynaa in cimriga aadanaha iyo noloshiisa dhabta ah uu yahay waxa uu ka tagayo oo dhaxal cilmiyeed ah, ama wax soosaar aqooneed mid aragti ku dhisan ama tijaabo, iyo wax kaste uu dadka u keenayo isagoon loo eegeynin waqtiga uu nool yahay, wuxuu yiri gabyaaga:

**عُمرُ الفتى ذكرُهُ لا طولُ مُدّتِهِ * وَموتُهُ خِزْيُهُ لا يومُه الدَّانِي**
**فَأَحْيِ ذِكرَك بالإحسانِ تُودِعُهُ * تَجمع بِذَلِكَ في الدُنيا حَياتانِ**

**Cimriga qofka waa xuskiisa ee dheeraanta muddadiisa ma aha ***
**Geeridiisana waa hooggiisa ee ma aha maalintiisa dhow**
**Xuskaaga ku nooleey wanaag aad meel dhiganayso ***
**Taas waxaad isugu keenaysaa adduunyada labo nolol**

Barakada cimriga dheeraantiisa ma aha kaliya, waa waxa qofka uu soo saarayo ama uu ku keenayo cimrigan adeegga diintiisa iyo ama aduunyadiisa ama aduunyada dadka, waxaa ugu khayr badan dadka qofkii cimrigiisa dheeraaday camalkiisana hagaagay, dadka waxaa ugu shar badan qof cimrigiisa dheeraaday camalkiisana xumaaday, dadka waxaa kaloo ugu khayr badan qofka ugu waxtar badan dadka.

فقد سئل نبينا (صلى الله عليه وسلم): يا رسولَ اللَّهِ أيُّ النَّاسِ خيرٌ؟ قالَ (صلى الله عليه وسلم): **(مَن طالَ عمرُهُ ، وحَسنَ عملُهُ)**، قيلَ: فأيُّ النَّاسِ شرٌّ؟ قالَ : **(مَن طالَ عمرُهُ وساءَ عملُهُ)**.

Waxaa la weyddiiyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee): rasuulkii Allow dadka yaa ugu khayr badan? Wuxuu yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): **(qofkii cimrigiisa dheeraado camalkiisana wanaagsanaado)** waxaa la yiri: dadka yaa ugu shar badan, wuxuu yiri: **(qofkii cimrigiisa dheeraado oo camalkiisa xumaado),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha haatee):

**(أحبُّ الناسِ إلى اللهِ أنْفَعُهُمْ لِلنَّاسِ).**

**(Dadka Alle loogu jecel badan yahay waa dadka ugu waxtarka badan)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

Sidey shareecada Islaamka noogu boorrisay ka faa'ideysiga waqtiga muhimka uu yahay ayay nooga digtay in la mooganaado, iyo halista lumintiisa, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَأَنفِقُوا مِن مَّا رَزَقْنَاكُم مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِيَ أَحَدَكُمُ الْمَوْتُ فَيَقُولَ رَبِّ لَوْلَا أَخَّرْتَنِي إِلَى أَجَلٍ قَرِيبٍ فَأَصَّدَّقَ وَأَكُن مِّنَ الصَّالِحِينَ * وَلَن يُؤَخِّرَ اللَّهُ نَفْسًا إِذَا جَاءَ أَجَلُهَا وَاللَّهُ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ}،**

**(Bixiya wax ka mid ah waxa Eebe idinku arsuqay geerida horteeda oo markaas uu yiraahdo (ruuxaan wax baxsan) Eebow maad muddo dhow dib ii dhigtid oon sadaqaysto kuwa suubanna aan ka mid noqdee * Naf malageed galayna Eebe dib uma dhigo, Ilaahayna waa ogyahay waxaad Camal falaysaan)** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(نِعْمَتَانِ مَغْبُونٌ فِيهِمَا كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ الصِّحَّةُ وَالْفَرَاغُ)،**

**(labo nimco dad badan ayaa lagu kadiyay caafimaadka iyo firaaqada),** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لَا تَزُولُ قَدمَا عَبْدٍ يَوْمَ الْقِيَامَةِ حَتَّى يُسْأَلَ عَنْ أَرْبَعِ خِصَالٍ: عَنْ عُمُرِهِ فِيمَا أَفْنَاهُ ؟ وَعَنْ شَبَابِهِ فِيمَا أَبْلَاهُ؟ وَعَنْ مَالِهِ مِنْ أَيْنَ اكْتَسَبَهُ وَفِيمَا أَنْفَقَهُ؟ وَعَنْ عِلْمِهِ مَاذَا عَمِلَ فِيهِ؟)،**

**(Addoonka labadiisa cagood ma suulayaan maalinta qiyaame ilaa laga weyddiiyo afar waxyaabood: cimrigiisa muxuu ku dhammeeyay? Dhalinyarnimadiisa muxuu ku**

**baabi'iyay? hantidiisa intuu ka keenay xaggee buuna ku bixiyay? Aqoontiisa muxuu ku sameeyay?),** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(تصدَّقوا قَبْلَ أن لا تَصَدَّقوا).**

**(sadaqeysta sadaqada intaan laydinka reebin).**

Dadka waxaa ka mid ah qof waqtiga uu xadayo, hadduusan xadinna waqtiga wuxuu isku dayaa isaga inuu dilo waqtiga, maxaayeelay wuxuu haystaa firaaqo xun oo caajis wadata, arrinka diintiisana kuma sugna kan adduunyadiisana kuma jiro, wuxuuu leeyahay sayidkeena Cabdullaahi bin Mascuud (Alle raalli haka noqdee): waxan necbahay inaan arko qof firaaqo ah aan ku jirin camal adduunyo iyo camal aakhiraba, maxaa ka fiican qofkii yiri:

**وَالوَقْتُ أَنْفَسُ مَا عُنِيتَ بِحِفْظِهِ * وَأَرَاهُ أَسْهَلَ مَا عَلَيْكَ يَضِيعُ**

**Waqtiga waa kan ugu qaalisan inaad ilaaliso ay tahay ***
**Waxaan u arkaa inuu yahay ka ugu fudud oo kaa lumayo**

Maxaa inooga baahi badan inan ku camirno waqtigeena wixii wax noo taraya, oona u faa'idaynaya bulshadeena iyo dalkeena, ilaa laga helo guul iyo hormar, iyo liibaanta adduunka iyo aakhiro.

**Ilaahayow nagu arsaaq barakada waqtigeena iyo cimrigeena**